



**Nofeembar 2025  
Doorasho Gaar ah  
Galalka Xogta  
Codbixiyaasha Degmada  
Multnomah  
oo Soomaali ah**

# Labo qaab oo Aad Ku soo Celinayso Warqadaada Codbixinta

Ku soo celi Warqadaada Codbixinta boostada adoo adeegsanaaya boostada celinta lacagteeda hore loo bixiyay marka la gaadho ama kahor Maalinta Doorashada; ama Ku soo Celi Warqadaada Codbixinta Goobta Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ugu dambayn 8:00 p.m. Maalinta Doorashada Nofeembar 4, 2025.

## Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah

**Nofeembar 4, 2025 Doorasho Gaar ah**

## Gudaha Xogta Codeynta Luuqadaha Badan

## Xusuusinnada Muhiimka ah ee Doorashada

Muddada kama dambaysta ah ee is-diiwaangelinta codbixiyaha

Isdiiwaangeli si aad u codeyso ugu dambayn **Talaadada, Oktoobar 14, 2025**. Haddii loo baahdo, wax kabaddel xogtaada diiwaangelinta codbixiyaha ama iska diiwaangeli si aad uga codeyso barta [OregonVotes.gov/MyVote](https://OregonVotes.gov/MyVote)

Xiritaanka iyo Isbeddellada Goobta Codbixinta ee Rasmiga ah Sababo La Xiriira Dhisidda goobaha sanduuqyada codbixinta rasmiga ah ee saamayn kasoo gaartay xiritaannada dhismaha maktabada ee doorashadaan.

Gudaha waxaa ka helaysaa xog dheeraad ah oo ku saabsan isbeddellada goobaha ee Goobta Codbixinta Rasmiga ah.

Macluumaad Doorasho oo la isku halayn karo

**Xusuusnow:** Dariiqa ugu wanaagsan ee codbixiyeyaasha Degmada Multnomah ku heli karaan macluumaad doorasho oo la isku halayn karo waa inay booqdaan boggeena internetka ee [MultnomahVotes.gov](https://MultnomahVotes.gov) ama inay naga soo wacaan 503-988-VOTE (8683).

**Dhismaha Doorashooyinka Degmada Multnomah Duniway-Lovejoy (Multnomah Duniway-Lovejoy Elections Building)**



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

1040 SE Morrison Street, Portland, OR 97214

## **Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express)**

(Ku dhex taala Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building))

600 NE 8th Street, Gresham, OR 97030

Waxay furuntahay Oktoobar 20 – Nofeembar 4, 2025



## **#MultnomahVotes**

@MultCoElections

Taleefanka: 503-988-KA CODEE 800-735-2900 TTY

[MultnomahVotes.gov](https://MultnomahVotes.gov) [elections@multco.us](mailto:elections@multco.us)

## **MIYAAD U BAAHANTAHAY CAAWIMAAD SI AAD U CODEYSO?**

La xiriir Waaxda Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections)

Taleefanka: 503-988-VOTE (8683)

Adeegga Gudbinta Oregon (Oregon Relay Service) (TTY): 711

**FADLAN OGOOW: Waaxda Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections) ayaa u daabacda xogta sida loogu soo diray. Ma saxno hinkaada, shaqallada, naxwaha, jumlada, ciladaha ama xogta khaldan.**



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

## Mudane/Marwo Codbixiye,

Waa kuwan dhowr arrimood oo muhiim ah oo ay tahay inaad ka ogaato Doorashada Gaarka ah ee dhici doonta Noofembar 4, 2025:

- **Kaliya doorashadani waxa loogu talagalay cod-bixiyayaasha ka diiwaangashan Magaalada Portland (City of Portland) iyo Degmada Lake Oswego School (Lake Oswego School District). Haddii aanad ka diiwaangashanayn mid kamida labadan degmo ma heli doontid warqada codeynta ee doorashadan.**
- Muddada is-diiwaangelintu ku egyahay diiwaangelinta cod bixiyuhu waa **Tallaado, Oktoobar 14, 2025**. Waxaad ka arki kartaa marxalada diiwaan gelintaada waxna waad ka badeli kartaa haddii loo baahdo adoo booqanaayat [www.OregonVotes.gov/MyVote](http://www.OregonVotes.gov/MyVote)
- Degmada Multnomah ma furi doonto dhammaan goobaha sanduuqyada codbixinta rasmiga ah doorashadan. Si aad u hesho liiska goobaha rasmiga ah ee yaalla sanduuqa codbixinta ee aadka ugu dhow degmadaada, fadlan booqo webseedkeena, [www.Multco.us/Dropsites](http://www.Multco.us/Dropsites).
- **Shan goobaha sanduuqyada codbixinta rasmiga ah ayay saamayn kasoo gaartay xiritaannada dhismaha maktabada ee doorashadaan. Goobahaan waxaa kamid ah: Belmont, Hollywood, Rockwood, Sellwood – Moreland iyo St. Johns Maktabadaha (Belmont, Hollywood, Rockwood, Sellwood - Moreland and St. Johns libraries).** Haddii aad si joogto ah u booqato midkood goobahaan maktabada, fadlan akhri boggeen Xogta Isbadelka ku dhacay Goobaha Sanduuqyada Codbixinta Rasmiga ah si aad u hesho faahfaahin dheeri ah oo ku aadan sida loo keeno warqadaada codbixinta midkood goobaheena cusub ee sanduuqa codbixinta rasmiga ah.
- **M & M Dhaqidda Gawaarida/Regal Cinemas Tiyaatarka (M&M Carwash/Regal Cinemas) (SE Qeybta iyo 165<sup>th</sup> Ave.) ma noqon doonaan goob la dhigo waraaqaha cod-bixinta rasmiga ah.** Doorashooyinka ayaa ka shaqeynaya inay dejiyaan goobta dhigida waraaqaha cod-bixinta ee cusub xaafadan.
- Laga bilaabo 8:00 p.m. habeenka doorashada, natiijooyinka hordhaca ah ee doorashada waxaa lagu soo daabici doonaa websaydkeena, [www.MultnomahVotes.gov](http://www.MultnomahVotes.gov).

Warqadaha codbixinta ayaa boostada loogu diri doonaa codbixiyaasha diiwaan gashan maalinta Arbacada ah, Oktoobar 15, 2025. Haddii aadan helin warqadaada codbixinta



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

ugu danbayn Khamiista, Oktoobar 23, 2025, fadlan wac 503-988-VOTE (8683) ama iimeyl u dir [elections@multco.us](mailto:elections@multco.us).

Si loo tiriyo, warqadaha codbixinta la dhiibtay waa in **la keenaa xafiiska doorashooyinka degmada ee Oregon ama Goobta Goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ugu danbayn 8:00 p.m., Talaadada, Nofeembar 4, 2025, ama waa in boostada lagu soo diraa ugu danbayn Talaadada Nofeembar4, 2025.**

Daacadnimo,

Tim Scott

Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada Multnomah



## **Xaqiiqooyinka aad Ka Ogaanayso Codeynta iyo Doorashooyinka**

### **Yaa isku diiwaan gelin kara si ay uga codeeyaan Oregon?**

...Waa qasab inaad tahay muwaadin Mareykan ah.

...Waa inaad dagan tahay Oregon,

...Waa inaad jirtaa ugu yaraan 16 sano. Waxaad heli doontaa warqada koobaad ee codbixinta oo laguugu soo dirayao boostada marka aad jirto ugu yaraan 18 sano.

### **Waa inaad isku diiwaan gelisaa inaad codeyso ugu yaraan 21 maalmood kahor Maalinta Doorashada.**

### **Sidee ayaan iskugu diiwaan gelin karaa codbixinta?**

...Barta oonlaynka ah oo ah [oregonvotes.gov/register](https://oregonvotes.gov/register) ama

...Kaarka Diiwaan Gelinta Codbixiyaha ee Oregon oo warqad ah kaasoo laga soo qaadan karo xafiiska doorashada, DMV, maktabada dadwaynaha, ama xafiiska boostada.

### **Sidee ayay codeynta lagu diro boostadu u shaqeysaa?**

Dhammaan doorashooyinka Oregon waxaa qabta xafiiska doorashooyinka degmada.

Xafiiska doorashooyinka ayaa warqadaha codbixinta boostada toos ugu dira

codbixiyaasha. Codbixiyaasha ayaa buuxinaaya warqadahooda codbixinta, kadibna ku celinaaya xafiiska doorashooyinka ee degmada oo loogu diraayo boostada ama waxaa lagu ridi karaa Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah.

### **Ku dir codbixinta boostada adoo raacaaya dhawr talaabo oo fudud:**

- 1) Isku diiwaan gelinta Codbixinta
- 2) Hel Kaarka Ogeysiiska Codbixiyaha
- 3) Hel Galka Xogta Codbixiyaha
- 4) Hel Warqadaada Codbixinta
- 5) Ku Codee Warqadaada Codbixinta
- 6) Soo celi Warqadaada Codbixinta



## Sidee ayaan ugu codeynayaa warqadeyda codbixinta?

**U Codee Hal Musharax**

Musharaxa 1-aad

Musharaxa 2-aad

\_\_\_\_\_  
MISE Ku qor qaybta sare

Hel jawaabta musharaxa ama qodobka loo codeynaayo (“YES” (HAA) ama “NO” (MAYA)) ee aad dooranayso. Gebi ahaanba khad madoow ku masax goobinta geeska bidix ee dookhaaga adoo adeegsanaaya khadda buluuga ah ama madoowga ah. Ha adeegsan qalin koobiyo.

## Codadka Qorista Dookha

**U Codee Hal Musharax**

Musharaxa 1-aad

Musharaxa 2-aad

*Musharaxa 3-aad*  
MISE Ku qor qaybta sare

Si aad u qorto codka musharax aan ku jirin liiska warqada codbixinta, si buuxda u calaamadi goobinta geeska bidix ee laynka loo sameeyay xafiiska loo tartamaayo kadibna ku qor magaca buuxa ee musharaxa laynkaas.

- Xaqiiji inaad si sax ah u calaamadisay dookhaaga tartan kasta.
- Warqadaada codbixinta rasmiga ah ayay ku qornaan karaan tartannada daabacan labada dhinacba.
- Ku rid warqadda codbixinta boqshada soo celinta ee aqoonsiga leh.
- Akhri Bayaanka Codbixiyaha oo ku qoran boqshada soo celinta kadibna saxiix godka saxiixa.
- **Warqadaada codbixinta lama tirin doono haddii aadan saxiixin boqshada soo celinta.**
- Saxiix kasta waxaa loo eegayaa saxiixa diiwaan gelinta ee ku qoran galka. Saxiixyadu waa inay iswaafaqaan si warqada codbixinta loo tiriyo.

Haddii aad u codeyso musharixiin ka badan inta loo ogol yahay xafiis ama haddii aad ku codeyso **labadaba Yes (Haa) iyo No (Maya)** qodobka loo codeynaayo, waxaa la yiraahdaa codbixin xadkeedii dhaaftay **codkaagana lama tirin doono** tartankaas.



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Haddii aad khalad samayso ama aad badesho fikirkaaga inta aad calaamadinayso warqadaada codbixinta.

- Adiga ayaa sixi kara. Arag tusaalaha hoose.
- **Ka dhig dookhaaga mid si cad loo fahmaayo** si ujeedadaada loo fahmo codkaagana loo tiriyo si sax ah.

<input checked="" type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No <i>This one</i>	<input type="radio"/> Yes <input type="radio"/> No
<input type="radio"/> Yes <input checked="" type="radio"/> No <i>Not this</i>	<input type="radio"/> Yes <input checked="" type="radio"/> No

- Haddii aadan awoodin inaad saxdo warqadaada codbixinta, waxaad codsan kartaa warqadda codbixinta oo badel ah oo aad ka helayso xafiiska doorashooyinka

## Soo celi Warqadaada Codbixinta



Ku soo dir warqadaada codbixinta Boostada Mareykanka.  
Waa inaad boostada kusoo dirtaa marka la gaaro ama kahor Maalinta  
Doorashada, Talaadada, Nofeembar 4, 2025. Ku soo dirista boostadu qasab  
maaha.

Ku rid warqadaada codbixinta midkood goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga  
ah ee Oregon ugu danbayn 8:00 p.m. marka la gaaro ama kahor Maalinta  
Doorashada Talaadada, Maajo 4, 2025.

## Goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo furan 24 saac

### Portland

#### North

- **Rose Quarter** – Sanduuqa Lagu rido Waraaqda Codbixinta ee Rasmiga ah wuxuu ku yaal dhinaca koonfureed ee Rose Quarter, agagaarka isha ka burqanayso biyo iyo calaamada 'Rip City' – Inta lagu jiro saacadaha shaqada caadiga ah, baarkin bilaash ah oo aan ka badnayn 15 daqiiqo ayaa laga heli karaa aagga baarkinka Annex ee ku yaalla N. Drexler Dr oo ku yaalla meesha looga leexo Interstate Ave (Baarkin lama heli karo inta lagu jiro xiliga xafladaha Rose Quarter.) **Socod kaliyay.**
- **Dugsiga Hoose ee James John (James John Elementary School)** – 8315 N Lombard St. – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo yaala geeska wadada ee cirifta waqooyi-galbeed ee N Lombard St. iyo Charleston Ave. – **Socodka kaliya.**
- **Maktabada Kenton (Kenton Library)** (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda) – 8226 N Denver Ave.
- **Maktabadda North Portland (North Portland Library)** (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda) – 512 N Killingworth St.
- **Dukaanka Adeegga ee Horay loo Oran jiray Green Zebra (Green Zebra Grocery)** – 3011 N Lombard St. – Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee Rasmiga ah ayaa ku yaala geeska lagu lugeeyo. **Socod kaliya.**



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- **Seeraha McCoy (McCoy Park)** – oo ku taala geeska koonfur bari ee Seeraha McCoy (McCoy Park) oo u dhow isgoyska N Trenton St. iyo Newman Ave. – lug ayaa lagu geli karaa keliya.

## Northeast

- **Maktabada Albina (Albina Library) (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda)** – 205 NE Knott St.
- **Maktabada Gregory Heights (Gregory Heights Library) (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda)** – 7921 NE Sandy Blvd.
- **Maqaayadda McDonald's (McDonald's Restaurant)** – 2010 NE César E Chávez Blvd. – Sanduuqa codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala geeska galbeed ee NE 40th Ave. inta u dhexaysa NE Tillamook St. iyo Hancock St.
- **Xaafada Parkrose (Parkrose Neighborhood)** – 4390 NE 102nd Ave. – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala aaga baakinka bariga ee wadada ka timaada Xarunta Seeraha MHCC Maywood (MHCC Maywood Park Center) oo marta NE 102nd Ave. iyo Prescott St.

## Northwest

- **Maktabada Northwest (Northwest Library) (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda)** – 2300 NW Thurman St.

## Southeast

- **Waaxda Doorashooyinka ee Multnomah (Multnomah County Elections)** – 1040 SE Morrison St.
  - **SE 11th Avenue** – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala geeska bari ee SE 11th Ave. inta u dhexaysa SE Morrison St. iyo Belmont St.
  - **SE Belmont Street** – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala geeska waqooyi ee SE Belmont St. inta u dhexaysa SE 10th Ave. iyo 11th Ave.
  - **1040 SE Morrison Street** – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee Lugta lagu tagaayo/Baaskiilka lagu geli karo ayaa ku yaala aaga geeska dhismaha ku yaala koonarka SE 11th Ave. iyo Morrison St.
- **Qaadashada Buugaagta Hawthorne (Hawthorne Holds Pickup) (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda)** – 3557 SE Hawthorne Blvd. – Cod-bixiyeyaashu waxay isticmaali karaan sanduuqa buugaagta iyo sanduuqa cod-bixinta gudaha ah.
- **Maktabada Holgate (Holgate Library)** – 7905 SE Holgate Blvd. – Sanduuqa Codaynta ee Rasmiga ah wuxuu dhinaca bidix ka xigaa maktabadda aan xiriirka lahayn ee dhinaca bidix wv dhismaha, ee u dhow qaybta baarkinka. **Socod kaliya.**
- **Maktabada Midland (Midland Library)** - 805 SE 122nd Ave.– Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee Rasmiga ah ayaa ku xiga booska soo celinta buugga ee dhinaca koonfureed ee dhismaha. Waxaa waraaqaha codbixinta sidoo kale lagu



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

ridi karaa Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee yaala qaybta barakinka ee maktabadda.

- **Portland Mercado** – 7238 SE Foster Rd. – Sabduuqa Codbixinta rasmiga ah wuxuu ku yaalaa qasriga Portland Mercado ku yaasha SE Foster Rd. iyo 72nd Ave. **Socod kaliya.**
- **Rockwood Maktabada (Rockwood Library)** (Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah) – 17917 SE Stark St. – Fiiri Macluumaadka Baddelka Goobta Ladhigayo Waraaqaha Cod-bixinta Rasmiga (bogga 9) wixii faahfaahin ah.
- **Sellwood – Moreland Maktabada (Sellwood - Moreland Library)** (Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah) – 7860 SE 13<sup>th</sup> Ave. –Fiiri Macluumaadka Baddelka Goobta Ladhigayo Waraaqaha Cod-bixinta Rasmiga (bogga 9) wixii faahfaahin ah.
- **Maktabada Woodstock (Woodstock Library)** (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda) – 6008 SE 49th Ave.

## Southwest

- **A–Boy Qalab (A–Boy Supply)** – 7365 SW Barbur Blvd.
- **Maktabada Capitol Hill (Capitol Hill Library)** (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda) – 10723 SW Capitol Hwy.
- **Maktabada Hillsdale (Hillsdale Library)** (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda) – 1525 SW Sunset Blvd.
- **Maktabada Central (Central Library)** (Sanduuqa Buugaagta Maktabadda) – 801 SW 10<sup>th</sup> Ave. – Warqadaha codbixinta ayaa lagu ridi karaa aaga buugaagta la keeno ee **gaariga lagu galo** oo ku taala SW 10th Ave. inta u dhexaysa SW Yamhill St. iyo Taylor St.
- **Pioneer Barxadda Maxkamadda (Pioneer Courthouse Square)** – 700 block ee SW Broadway (ku xiga Starbucks kana soo horjeeda Nordstrom) – **Kaliya lug ayaa lagu geli karaa.**

## Gresham

- **Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express) – Saacadaha Kooban** – Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building), 600 NE 8th St. – Waxaa jira Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo yaala gudaha Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express) oo ku taala dabaqa koobaad ee Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building). Waxay furan tahay keliya inta lagu jiro saacadaha xarunta codbixintu furan tahay. Waxaad u baahan doontaa inaad baakinka gaariga dhigato aadna lugayso si aad ugu rido warqadaada codbixinta.



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Goobaha Ladhigayo Waraaqaha Cod-bixinta ee Rasmiga ah oo dheeraada ah, booqo:

- **Ismaamulka Clackamas:** [www.clackamas.us/elections](http://www.clackamas.us/elections)
- **Ismaamulka Washington:** [www.washingtoncountyor.gov/elections](http://www.washingtoncountyor.gov/elections)

## Isbadellada Goobta ee Goobta Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah

Wixii ku saabsan macluumaadka xidhitaanka Maktabada Ismaamulka Multnomah (Multnomah County Library) booqo:

[www.multcolib.org/library-construction-closures](http://www.multcolib.org/library-construction-closures)

**Ku rid warqadaada codbixinta midkood goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee Oregon ugu danbayn 8:00 p.m. marka la gaaro ama kahor Maalinta Doorashada Talaadada, Nofeembar 4, 2025.**

Si aad u hesho liiska goobaha rasmiga ah ee sanduuqa Codbixinta ee Degmada Multnomah, fadlan booqo webseedkeena: [www.MultCo.us/Dropsites](http://www.MultCo.us/Dropsites)

### North Portland

**Maktabada St. Johns (St. Johns Library) – 7510 N Charleston Ave.**

*Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.*

Haddii aad adeegsato Maktabada St. Johns (St. Johns Library) si aad u gayso warqadaada codbixinta, fadlan ogoow: sanduuqa codbixinta rasmiga ah ee kuugu dhow wuxuu ku yaalaa geeska wadada ee Dugsiga Hoose ee James John (James John Elementary School) (8315 N Lombard St.) ee geeska waqooyi-galbeed ee N Lombard St. iyo N Charleston Ave. Kani waa sanduuqa cod-bixinta ee lagu yimaado lug.

### Northeast Portland

**Maktabada Hollywood (Hollywood Library) – 4040 NE Tillamook St.**

*Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.*

Haddii aad isticmaasho Maktabada Hollywood (Hollywood Library) si aad u keento warqadaada codbixinta, fadlan ogow: sanduuqa codbixinta rasmiga ah ee kuugu dhow wuxuu ku yaalaa Hudheelka McDonald's (McDonald's Restaurant) (2010 NE Cesar Chavez Blvd.) Cod-bixiyayaasha ayaa isticmaali kara sanduuqa cod kuridida rasmiga ah ee dhanka galbeed ee NE 40<sup>th</sup> Ave inta u dhaxaysa NE Tillamook St. iyo Hancock St.



## Southeast Portland

**Maktabada Belmont (Belmont Library)** – 1038 SE César E Chávez Blvd.

*Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.*

Haddii aad u adeegsanayso Maktabadda Belmont (Belmont Library) si aad u keento waraaqdaada cod-bixinta, fadlan ogow: sanduuqa cod-bixinta rasmiga ee kuugu dhow wuxuu yaal gudaha Qaadashada Buugaagta Hawthorne (Hawthorne Holds Pickup) (3557 SE Hawthorne Blvd.) Codbixiyaasha ayaa adeegsan kara aaga buug dhigista iyo sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee gudaha.

**Maktabada Rockwood (Rockwood Library)** – 17917 SE Stark St. (Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah)

*Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis. Waxa dib loo furi karaa muddada cod-bixinta.*

Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta Rasmiga ah ee 24 saac furan ayaa ku yaala geeska lagu lugeeyo.

**Sellwood – Moreland Maktabada** (Sellwood - Moreland Library) – 7860 SE 13th Ave. (Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah)

*Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.*

Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta Rasmiga ah ee 24 saac furan ayaa ku yaala geeska lagu lugeeyo.



## Sameyso qorshe aad ku codaysid!

Doorashooyinka Ismaamulka Multnomah (Multnomah County Elections) waxay rabaan in dhammaan cod-bixiyayaashu awoodaan inay codeeyaan oo ay ogaadaan cida la weydiisto caawimo.

Kooxda Caawimada Cod-bixiyaha (Voter Assistance Team VAT) ayaa ka caawisa cod-bixiyayaasha naafada ah iyo cod-bixiyayaasha su'aalaha kale.

Yaa kusiin kara caawimo adiga si aad:

- Iskugu diiwaangalid inaad codaysid ama hubisid diiwaangalintaada cod-bixinta.
- Calaamadi ama akhri warqadaada cod-bixinta.
- Cusbooneysii ama xaqiiji magacaaga, ciwaankaaga ama macluumaad kale codbixinta.
- Faham shuruucda iyo tallaabooyinka doorashada ee cod-bixinta.

### Adeeggyadani markasta waa bilaash.

Waxbadan ka oggow ikhtiyaarada cod-bixinta aan saacidnay iyo kuwa madaxbanaan ee [MultnomahVotes.gov](http://MultnomahVotes.gov)

**Nagalaso xidhiidh adoo soo wacaya, iimayl u diraya ma foomkeena onlaaynka:**  
503.988.VOTE (8683) • [elections@multco.us](mailto:elections@multco.us)

Onlaayn:  
[Multco.us/VATForm](http://Multco.us/VATForm)

### Waxa ay tahay inaad sameysid si aad (u diyaarisid ama qorsheysid) inaad Codeysid

- Muddee wakhti aad tixgalisid xogta warqada cod bixinta.
- Ku xidhnow dadka si aad ugala hadashid arrimaha.
- Ka samee cilmi-baadhistaada wabsaaydka, telefishanka, raadhiyowga, ama wareysiga.
- Sii wakhti aad ku fiirisid codkaaga.

Turjumaadaha luuqada, booqo [MultnomahVotes.gov](http://MultnomahVotes.gov) oo u dhaadhac dhanka hoose.



## Cabirka 3-628

### Lake Oswego Lambarka Degmo Dugsiyeedka 7J (Lake Oswego School District No. 7J)

Daynta maalgashiga si loogu horumariyo badqabka, amniga; loogu cusbooneysiyo fasalada, awooda; lagu casriyeeyo xarumaha

#### **SU'AASHA:**

Dugsi Degmeedku wuxuu leeyahay qiyaasta cashuurta daynta maalgashiga, saamiyada si loogu horumariyo badqabka, loogu dayactiro dugsiyada, loogu kordhiyo fasalada. waxbarashada xirfada/farsamada?

Haddii daynta maalgashiga la ogolaado, waxaa laga bixin doonaa canshuuraha guryaha ama mulkiyada guryaha kuwaasoo aan ku jirin xadidaadada qodobada 11 iyo 11b, Farqadda XI ee Dastuurka Oregon.

#### **NUXURKA:**

**Qiyaastani waxa la filayaa inay haysato daynta maalgashiga Lake Oswego Dugsi (Lake Oswego School District) Degmeed waxaanay ansixiyeen \$245 milyan oo xaddiga daynta maalgashiga si loo maalgaliyo kharashaadka hantida, oo ay kujiraan:**

#### **Dugsiyo Badqaba, Amaan ah:**

Loo cusbooneysiyo nidaamyada qayla-dhaanta dabka  
Casriyeeyo albaabo fasal oo amaan ah  
Lagu rakibo muraayado adag  
La balaadhiyo inta kamaradu qabanayso  
Kor loo qaado nidaamyada wada-xidhiidhka degdega ah  
La horumariyo adkaysiga qaab-dhismeedyada

#### **La Baddelo Labada Dugsi ee ugu Da' Weyn**

La baddelo dugsiyada hoose ee Forest Hills iyo Lake Grove (Forest Hills and Lake Grove Elementary Schools). Oo la dhisay 1940-yadii, qasabadaha biyaha ayaa lagu rakibay sagbad, oo seeska ayaan u adkaysan karin gariir.

#### **Lahorumariyo Xarumaha Duqoobay**

La horumariyo saqafka, daaqadaha, HVAC, qasabadaha, nidaamyada korontada  
La cusbooneysiyo xarumaha madadaalada



La helo agabka qurxinta, qalabka tiknoolajiyada

## **Deegaano Waxbarasho oo Casri ah**

Dugsiyada Sare ee Lakeridge iyo Lake Oswego ayaa heli doona fasallo la ballaadiyey oo la casriyeeyey ee Sayniska, Tiknoolajiyada, Injineerinka iyo Xisaabta (Science, Technology, Engineering, and Math — STEM) iyo Waxbarashada Xirfadda iyo Farsamada (Career and Technical Education — CTE).

La iibsado hanti, dib loo nashqadeeyo Barnaamijka Kala-guurka Bulshada Lagudaro fasalo si loo daboolo baahida Palisades

## **Waxay u baahan tahay kormeer bulsho, baadhid joogto ah**

Daynta maalgashiga ayaa lagu bixin karaa taxaneyaalka badan, ayadoo qaangaarayso 26 sano gudahood. Waxa la filayaa in aanay ka kordhin heerka daynta maalgashiga \$2.90 halkii \$1,000 ee la qiimeeyeyba. Qiimaha rasmiga ah ee canshuurta ayaa ka duwanaa kara sabab la xiriirta isbadellada ku dhaca qiimeyaasha dulsaarta iyo qiimaha guriga lagu qiimeeyay.

## **Bayaanka Sharaxaada ah:**

Lake Oswego Dugsi Degmeed (Lake Oswego School District LOSD) ayaa u adeegga qiyaastii 6,800 arday oo ka socda 11 dugsi oo inta badana lagu aqoonsadaa tobanka ugu fiican Oregon nidaamyada waxbarashada K-12, marka loo eego Niche.

## **MAALGASHIGA BULSHADA EE DUGSIYADA**

Cabirka dayntan maalgashiga ayaa u taagan wajiga ugu danbeeya ee qorshaha saddexda qeybood ee lagaga dhisayo dugsiyo badqaba, casri ah oo adkaysi leh Lake Oswego.

## **Lafilayo inuu Siihaysto Heerka Cashuurta Hadda**

Haddii la ansixiyo, daynta maalgashiga \$245 ayaa la sadaalinayaa inay sii ahaato heerka cashuurta daynta maalgashiga hadda ee LOSD ee \$2.90 halkii \$1,000 qiimaha hantida la qiimeeyey. Wax korodh heerka cashuurta daynta maalgashiga lama filayo.

## **WAXKAQABASHADA BAAHIYAHA HADDA**

- **Badqabka iyo Xaaladaha Degdega**

Dhowr dugsi ayaa heli doona horumarinta badqabka, oo ay kujiraan nidaamyada dab-damiska cusub, helitaanka albaabo fasal, kamarado la kordhiyey, horumarinta wada-xidhiidhka xaaladaha degdega, iyo rakibaada daaqado muraayada oo adag.



- **Kaabayaasha Dhaqaale ee Duugoobay**

Dhismayaasha dugsiyo badan ayaa jira tobanaan sano muddooyin oo ku tiirsan nidaamyada duqoobay. Saqafyada, daaqadaha, HVAC, qasabadaha, iyo nidaamyada korontada ayaa la dayactiri doonaa ama la baddeli doonaa si loo taageero hawlo caafimaad, badqab, iyo waxtar leh.

- **Waxkabaddelida Dugsiyada Hore**

Dugsiyada hoose ee Forest Hills iyo Lake Grove (Forest Hills and Lake Grove Elementary Schools), oo la dhisay 1940-yadii, ayaa leh nidaamyada duugoobay iyo kaabayaal xumaaday, oo ay ku jiraan qasabado la dhexgaliyey sagbad iyo sees aan la horumarin karin. Baddelida ayaa ka kharash yaraan doonta dayactirka balaadhan.

- **Awooda Goobta Waxbarasho**

Dugsiyada Sare ee Lakeridge iyo Lake Oswego (Lakeridge and Lake Oswego) ayaa heli doona fasallo la ballaadiyey oo la casriyeeyey ee Sayniska, Tiknoolajiyada, Injineerinka iyo Xisaabta (Science, Technology, Engineering, and Math — STEM) iyo Waxbarashada Xirfadda iyo Farsamada (Career and Technical Education — CTE). Dugsiga hoose ee Palisades (Palisades Elementary) ayaa heli doona fasalo dheeraad ah si uu u caawiyo diiwaangalinta kordhaysa. Barnaamijka Kala-guurka Bulshada, oo caawiya ardayda leh dibudhac koriin ee u diyaargarobaya nolol madaxbanaan, ayaa heli doona xarun loo nidaamiyey.

## **CODSIGA DAYNTA MAALGASHIGA 2025**

Iyadoo lala diyaariyey wakiillada bulshada, codsigan daynta maalgashiga waxa loogu talagalay inuu wax ka qabto baahiyaha hadda iyadoo ilaalinaysa heerka cashuurta daynta maalgashiga ee hadda ee LOSD.

Haddii la ansixiyo, daynta maalgashiga ayaa maalgalin doonta:

### **Horumarinta Caafimaadka, Badqabka, iyo Amaanka**

- Loo cusbooneysiyo nidaamyada qayla-dhaanta dabka
- In lagu rakibo albaabo fasal oo amaan ah iyo daaqado muraayado adag ah
- La balaadiyo inta kamaradu qabanayso
- Kor loo qaado nidaamyada wada-xidhiidhka degdega ah
- Lagudaro xoojinta u adkaysiga dhul-gariir ilaa Heerka 4 “Adkaysi u Leh Dhacdooyinka”

### **Ilaalinta iyo Horumarinta Xarunta**

- Horumarin saqafka, daaqada, HVAC, qasabada, iyo nidaamyada korontada
- Sooceli xarumaha jimicsiyada jidhka
- Baddel qalabka qurxinta, agabka, iyo tiknoolajiyada



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

## **Waxkabaddelida Dugsiga Hoose ee ugu Da' Weyn**

- Dib loogu dhiso dugsiyada hoose ee Forest Hills iyo Lake Grove (Forest Hills and Lake Grove Elementary Schools) goobahooda hadda.

## **Balaadhinta Goobta Waxbarasho**

- Kudar fasalada STEM/CTE labada dugsi sare
- La iibsado hanti, oo dib loo nashqadeeyo Barnaamijka Kala-guurka Bulshada
- Lagu daro fasalo Dugsiga Hoose ee Palisades (Palisades Elementary)

## **KORMEERKA IYO ISLA-XISAABTANKA**

Lacagaha daynta maalgashiga ayaa kaliya loo isticmaali karaa mashaariicda codka lagu ansixiyey. Kormeerka waxa kujira:

- Guddiga Isla-Xisaabtanka Daynta Maalgashiga ee Muwaadinka Hogaaminayo
- Baadhitaano joogto ah iyo warbixino saddex biloodle ah oo kharashaadka ah
- Lasocoshada Guddiga Dugsiga Lake Oswego
- U Hogaansanaanta ujeedooyinka barnaamijka daynta maalgashiga iyo sharciga gobolka

## **KHARASHAADKA**

Daynta maalgashiga ayaa lagu bixin karaa taxaneyaal, ayadoo qaangaarayisa 26 sano gudahood. Inkastoo heerka cashuurta daynta maalgashiga ee LOSD ayaa la qiyaasayaa inuu ahaado \$2.90 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyey, heerarka dhabta ah ayaa kala duwanaan kara iyagoo kusaleysan dulsaarka ribo iyo qiimaha hantida.

Waxbadan ka ogow [losdschools.org/bond2025](https://losdschools.org/bond2025).

*(Macluumaadkaan waxaa bixisay: Dr. Jennifer Schiele, Kormeeraha-guud)*



## Cabirka 26-260

### Magaalada Portland (City of Portland)

Ilaali beerta nasashada badqabka, deegaanka, madadaalo la awoodo iyadoo loo marayo cashuurta 5-sano ah.

#### **SU'AASHA:**

Ma Portland ilaaliso maalgashiga beeraha nasashada, madadaalada, dayactirk; cashuur shan-sano ah \$1.40 halkii \$1,000 qiimaha laga bilaabo 2026-2027? Cabirkani wuxuu ku sababi karaa cashuurta hantidu inay ka korodho saddex jeer waxkabadan boqolkiiba.

#### **NUXURKA:**

Sanadkii 2020, cod-bixiyayaasha Magaalada Portland (City of Portland) ayaa ansixiyey cashuurta shan-sano si loo caawiyo beeraha nasashada iyo hawlaha madadaalada ee dhacaya 2025. Haddii cashuur cusub aan la ansixin, miisaaniyada hawlgalka Beeraha-nashada ayaa la yareyn doonaa qiyaastii kala badh, taasoo keenaysa barnaamijyo iyo adeegyo yaraada.

Cashuur shan sano oo cusub ayaa sii wadi doonta hawlgalada, maalgalin doonta mashaariic hantiyeed oo cusub:

#### **HUBI DAYACTIRKA IYO NADAAFADA BEERAHA-NASAHSADA EE XAAFADA**

- Nadiifinta suuliga ee maalinlaha, qaadida qashinka
- Dayactirka joogtada, dayactirka kooban
- Dayactir ama cusbooneysi xarumaha sida garoomada, suuliyada, barkadaha dabaasha
- Ilaalinta badqabka baarkinada, jawaabaha dhacdooyinka

#### **ILAALI DEEGAANKA CIMILADA ISBADDELAYSA**

- Beer dhir, ilaali geedaha
- Ilaali goobaha dabiiciga ah, dariiqyada, tayada biyaha, nolosha deegaanka
- Nadiifi daaqa, ilaali dariiqyada xaaladaha degdega si loo yareeyo halista dabka

#### **ILAALI HELITAANKA BARNAAMIJKA**

- Sii wad barnaamijyada bilaashka, qiimaha jaban ee madadaalada qoysaska waajahaya faqriga
- Ilaali fasalada, saacadaha xarunta bulshada, farshaxanka iyo xarumaha dhaqanka, beeraha nasashada, barkada dabaasha



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Guddiga kormeerka bulshada ayaa dibu eegi doona kharashaadka cashuurta, oo bixin doona warbixino sanadle ah. Baadhis madaxbanaan ayaa loo baahan yahay.

Xaqle guri ayaa bixin kara ilaa \$310 sanadkii, ama \$26 bishii - \$11 bile korodh ah.

Cashuurta waxay yara kordhi doontaa qiyaastii \$86,268,997 sanadka 2026–2027, \$88,719,730 sanadka 2027–2028, \$91,411,705 sanadka 2028–2029, \$93,588,449 sanadka 2029–2030, iyo \$96,068,483 in 2030–2031, wadar dhan \$456,057,364.

## **Bayaanka Sharaxaada ah:**

Cabirkani wuxuu u saamixi doonaa Magaalada Portland (City of Portland) inay cashuurto \$1.40 halkii \$1,000 qiimaha la qiyaasay muddo shan sano ah si loogu shaqeeyo nidaamka beeraha nasashada iyo madadaalada, loo baddelo loona kordhiyo heerka hadda \$0.80 halkii qiimaha la qiyaasay cashuurta ee dhacaya kadib sanad xisaabeedka 2025-2026. Waxa kujira \$1.40 halkii \$1,000 cashuurta qiimaha la qiyaasay, \$1.37 waxa loo hayn doonaa hawlaha beerta nasashada iyo madadaalada iyo \$0.03 oo mashaariicda hantida ah. Adeegyada iyo barnaamijyada ayaa la qorsheeyey si loogu daro, balse kuma koobna:

- Dayactirka garoomada beeraha nasashada, barkadaha dabaasha, suuliyada, iyo xarumaha kale ee u baahan dayactir weyn.

Canshuurta waxay sii wadi doontaa bixinta:

- Nadiifinta musqulaha maalinle ah iyo qaadista qashinka beer kasta oo nasasho ah oo la horumariyey.
- Xafladaha xagaaga iyo barnaamijyada “Free Lunch & Play,” iyo “Free for All” — filimaan iyo bandhig-faneedyo bilaash ah.
- Baadhitaanka geed kasta oo beerta nasahada, ku sameynta dayactirka kahortaga geedaha beerta si loo siiyo mudnaan badqabka dadweynaha.
- Shaqo dheeraada oo maalinlaha laguna sameeyo beerta nasashada, goobaha dabiiciga, dariiqyada, iyo xarumaha bulshada oo ay kujiraan:



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

## Badbaadada

- Caawinta badqabka hubinta khataraha ee beeraha nasashada iyo goobaha dabiiciga, ilaalada Beerta, oo ay kujiraan jawaabta dhacdo, iyo xarumaha xidhida habeenkii.
- Gudashada kahortaga dabka iyadoo loo maraayo nadiifinta goobta, simida geedaha, kasaarida waxyaabaha aan wacnayn iyo khataraha kale, iyo ilaalinta dariiqyada xaaladaha degdega ah.

## Dayactirka Joogtada ah

- Baadhida hantida beerta nasashada sida garoomada, dariiqyada, wadooyinka, biriishyada, iyo xarumaha bulshada.
- Dayactirka hantida beerta nasashada iyo gudashada dayactirka joogtada sida rinjiyeynta, nijaarka, korontada, makaaniga, iyo shaqada qasabada.
- Horumarinta badbaadada, helitaanka, iyo isticmaalka sanadka oo dhan ee wadooyinka iyo dariiqyada beerta, iyadoo la dayactirayo lana ka saarayo khataraha.

## Deegaanka-dabiiciga

- Caawinta deegaankeena iyadoo lagu beerayo dhir dhalad u ah deegaanka, horumarinta noolaha deegaanka, hagaajinta, iyo daryeelida hantida sida calaamadaha, albaabada, dayrarka, biriishyada.
- Ku beerida dhir cusub goobaha banaan.

## Barnaamijyada La Awoodo

- Siinta ikhtiyaaro bilaash ama kharash jaban qofkasta oo Portlander ah, iyadoon loo eegin dakhliga, ayaa kaqeybgali kara.
- Furitaanka xarumaha bulshada iyo barkadaha dabaasha ee leh barnaamijyo iyo fasalo kala duwan.

Maalgashiga iskaashiga si loo bixiyo adeegyo, barnaamijyo, iyo qorshayaal bulsho, oo ay kujiraan helitaanka xarumaha PP&R ee barnaamijka iskaashiga lagu bixiyo, Ka faa'idayso awooda mutadawiciinta oo la shaqee kooxaha deegaanka iyo gobolka si loo horumariyo badqabka, jiritaanka, xidhiidhka, iyo horumarka muddada dheer ee beeraha nasashada iyo nidaamka madadaalada Portland.

Guddiga kormeerka bulshada ayaa la magacaabi doonaa si ay dib ugu eegaan kharashaadka cashuurta, xogta, iyo cabirka ugu yar waxqabadka iyo warbixinaha sanadlaha ee lasiinayo Golaha Magaalada oo kaqeyb ah nidaamka miisaaniyada. Xafiiska Beeraha Nasashada ayaa bixin doona baadhis waxqabad si loo hubiyo in adeegyada ay maalgaliso cashuurta sii waafaqsanaan doonaan rabitaanka codeeyaha.



# Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Magaalada ayaa qiyaasaysa in heerka cashuurta ee \$1.40/\$1,000 qiimaha la qiyaasay ku kici doono qiyaastii hantida guriga \$11 bishiiba muddada cashuura hadda (Ama \$26 bishiiba), oo ka dhigaysa qiyaastii \$86 milyan sanad xisaabeedka koobaad laguna qiyaasayo celceliska \$91 milyan la ururiyey sanadle muddo shan sano ah. Haddii cashuur cusub aan la ansixin, miisaaniyada hawlgalka Beeraha-nashada ayaa la yareyn doonaa qiyaastii kala badh, taasoo keenaysa barnaamijyo iyo adeegyo yaraada.

*(Macluumaadkaan waxaa bixisay: Elana Pirtle-Guiney, Madaxweynaha Golaha Magaalada Portland)*

